



DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

MIISAANIYADDA
DOWLADDA
PUNTLAND SM 2026

"DIFAAC & HORUMAR"

GAROWE, December 2025

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 25 ^{AAD}	CADADKA 12 ^{AAD}	TAARIIKH: 12/23/2025	Lam. 06
---------------------------	---------------------------	----------------------	---------

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

MIISAANIYAD SANADEEDKA 2026 EE BILAHA JANAAYO ILAA DISEEMBAR

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Miisaaniyad Sanadeedka 2026 ee bilaha Janaayo ilaa Diseembar</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA MADAXWEYNE
KU-XIGEENKA



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب نائب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

Sharci Lr. 06 ee 24-ka December 2025, kuna saabsan Miisaaniyad Sanadeedka 2026 ee bilaha Janaayo ilaa Diseembar.

Ku-simaha Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 81-aad, 135-aad iyo Qodobkiisa 136-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/47/2025, kuna taariikhaysan 11-da Diseembar, 2026.

Markuu fixgeliyey: Baahidda loo qabo Ansixinta Miisaaniyadda Sanadka 2026 ee bilaha **Janaayo ilaa Diseembar**.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Miisaaniyadda Sanadka 2026-ta ee bilaha **Janaayo ilaa Diseembar**.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3-aad

Dhaqangal, Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

Ilyas Osman Lugatoor

K/S Madaxweynaha ahna Madaxweyne Ku-Xigeenka Dowladda Puntland



Tell: 0906777711

E-mail: vp@plstate.so

website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/47/2025 Garoowe, Khamiis, Taariikh:-11/12/2025

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

**Ujeeddo: -Ansixinta Miisaaniyad Sannadeedka 2026
(Janaayo 1, 2026 —Diseembar 31, 2026)**

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-

MARKUU ARKAY:-

Qodobada 60-aad, 64-aad, 68-aad, 135-aad iyo 136-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Qodobada 2-aad, 3-aad, 57-aad, 58-aad iyo 63-aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Xeerarka kala ah; Xeer Lr. 09 ee 15/08/2023 kuna saabsan **Maamulka Maaliyadda Guud** ee Dawladda Puntland iyo Xeer Lr. 11 ee 20/12/2023 kuna saabsan **Cashuuraha Berriga** Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY: -

Soo gudbinta Ku-simaha Madaxweynaha Dawladda Puntland Ref: XMWK/DPS/217/2025 ee November 19, 2025, kuna saabsanayd soo gudbinta Ansixinta Miisaaniyadda Dawladda Puntland ee 2026-ka.

MARKUU TIX-GELIYEY: -

Baahida loo qabo Ansixinta Miisaaniyadda 2026-ka ee Janaayo 1, 2026 —Diseembar 31, 2026.

MARKUU DHEGEYSTEY:-

Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 57-aad, fadhigiisa 20-aad ee 04/12/2025 ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2026-ka ee Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (45) Mudane, waxaa ugu Codeeyey Oggol (43) Mudane, Diidmo (1) Mudane, halka uu ka aamusay (1) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Miisaaniyad Sannadeedka 2026 ee Janaayo 1, 2026 ilaa Diseembar 31, 2026, iyadoo lagu saleynayo go'aannada Golaha Wakiilladu ku ansixiyey, kuwaas oo kala ah:

1. In si buuxda loogu dhaqmo lana dhowro dhammaan xeerarka, qawaaniinta iyo habraacyada maamulka maaliyadda iyo xisaabaadka Dawladda, si loo xaqiijiyo hannaan maaliyadeed oo hufan, kuna dhisan isla xisaabtan waafaqsan xeerarka dhaqan-galka ah.
2. In madaxyada miisaaniyadda loogu dhaqmo sida Goluhu u ansixiyey, lana ilaaliyo ku dhaqanka xeerka qoondada miisaaniyadda 2026 iyo shaxaha cashuuraha ee la socda.
3. In si wax ku ool ah loo kordhiyo dakhliga ururinta gudaha, lana beekhaamiyo kharashka la gelayo, iyadoo la raacayo xeerka qoondada Miisaaniyadda 2026 iyo habraacyada maaliyadeed ee dhaqan-galka ah.
4. In la dhiirrigeliyo Wasaaradaha iyo hay'adaha dakhli-ururinta, lana joogteeyo khidmad-celintooda si ay si hufan u gutaan waajibaadkooda, lana qabto shirweyne dakhli oo saddex biloodle ama lix biloodle ah, si loo mideeyo qorshayaasha, loona hagaajiyo ururinta dakhliga gudaha.
5. In hay'adaha Dawladda ee ay khuseyso ay diyaariyaan qorshe lagu yareynayo saameynta taban ee ka dhalanaysa hoos u dhaca ku yimi kharashaadka miisaaniyadda ka baxsan khasnadda (Off-budget), gaar ahaan saameynta uu ku leeyahay maalgelinta mashaariicda iyo adeegyada bulshada. Sidoo kale, in la xoojiyo isku-dhafka iyo wada-shaqeynta hay'adaha fulinaya mashaariicdaas, si loo hubiyo in mashaariicda muhiimka u ah bulshada ay sii socdaan, loona yareeyo culayska miisaaniyadda dawladda ee muddada dheer.
6. Inkasta oo horumar muuqda laga sameeyey, haddana Goluhu wuxuu go'aamiyey in Miisaaniyadda 2027 lagu soo daro dhammaan Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose ee Puntland, oo hadda ka kooban 24 degmo, si loo fuliyo qodobka 135-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland, loona xaqiijiyo mideynta, hufnaanta iyo wada-gaarista qorsheyaasha maaliyadeed ee heer deegaan
7. Iyadoo la tixraacayo in qodobkan lagu ansixiyey miisaaniyaddii hore ee 2025, hase yeeshee aanu dhaqangelin, Goluhu wuxuu mar kale go'aamiyey in habraaca shaqaalaysiinta ee shaqaalaha la isku beddelay iyo kuwa cusub—kuwaas oo hawlhoodu muddo dheer hakad ku jireen— si degdeg ah loo dhammaystiro, si ay u helaan xuquuqdooda shaqo, maadaama ay muddo dheer ahaayeen xuquuq la'aan, taas oo aan waafaqsanayn mabaadi'da caddaaladda shaqaalaha iyo hufnaanta maamulka.

8. In Golaha Wakiillada la hor keeno faah-faahinta hay'adaha wadaagga ka ah iyo mashaariicda ay ku qoondaysantahay Miisaaniyadda ka baxsan khasnadda Dawladda (Off-budget), si Goluhu uga helo xog-dhammaystiran oo ku saabsan hay'adaha fuliya, mashaariicda ay ku qoondeysan yihiin, iyo gobollada ay ka fulinayaan.
9. In Xeerkii iyo Tariifadii Cashuuraha Furdooyinka la soo gudbiyo Golaha Wakiillada ka hor inta aan la gaarin Kalfadhiga soo socda ee bisha Juun 2026, haddii Eebbe idmo.
10. In dib loo soo celiyo madax-xigaha "Horumarinta Caasimadda", kaas oo lagu dari doono bogga 28-aad ee madaxda Horumarinta Kaabayaasha "3111", iyadoo kharashka ku bixi doona madax-xigahan cusub laga soo wareejinayo 5% (\$39,300) madax-xigaha 226101 ee bogga 25-aad, 19.6% (\$10,738) madax-xigaha 227203 ee bogga 25-aad, iyo 20% (\$10,000) madax-xigaha 311116 ee bogga 28-aad, si loo xaqiijiyo horumarinta kaabayaasha Caasimadda.
11. In Miisaaniyadda Dawladda Hoose ee Degmada Balidhidin lagu lifaaqo Miisaaniyadda Sanadka 2026, taas oo tirada guud ee degmooyinka ku jira Miisaaniyadda 2026 ka dhigaysa 25 (shan iyo labaatan) degmo.
12. In kharashka horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha (waddooyinka) ee ku jira madax-xigaha 311104 looga qoondeeyo 30% waddooyinka ka baxsan laamiga weyn, si loo xaqiijiyo in horumarinta waddooyinku u wada gaarto dhammaan deegaannada, loona ilaaliyo caddaaladda, sinnaanta adeegga iyo danta guud ee bulshada.

Wada Shaqeyn Wacan



Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.



TUSMADDA

GUUD MARKA MIISAANIYADDA 2026	7
XEERKA QOONDADA MIISAANIYADDA DOWLADDA PUNTLAND SANNADKA 2026.....	8
CUTUBKA 1AAD	9
QODOBO GUUD	9
QODOBKA 1-AAD	9
MAGACA XEERKA	9
QODOBKA 2-AAD	9
ERAY BIXIN	9
QODOBKA 3-AAD	10
UJEEEDADA XEERKAAN	10
QODOBKA 4-AAD	10
BAAXADA AWOODA XEERKAN	10
CUTUBKA 2-AAD	10
MAAMULKA MIISAANIYADDA DPL	10
QODOBKA 5-AAD	10
MASUULIYADDA MAAMULKA IYO DHAQANGALINTA MIISAANIYADDA.....	10
QODOBKA 6-AAD	10
QOONDADA MIISAANIYADDA DPL EE SANNADKA 2026	10
QODOBKA 7-AAD	11
MUDNAANTA KHARASH BIXINTA DOWLADDA	11
QODOBKA 8AAD	11
QABASHADA DAKHLIGA DOWLADDA IYO BIXINTA KHARASHKA	11
QODOBKA 9AAD	11
HABRAACA LACAG KA SAARIDA KHASNADA GUUD EE DPL	11
QODOBKA 10AAD	12
KALA WAREEJINTA MIISAANIYADDA DPL	12
QODOBKA 11AAD	12
KABKA MIISAANIYADDA	12
QODOBKA 12AAD	12
DAYMAHA SHARCIGA AH IYO AMAAHDA DAWLADA.....	12
QODOBKA 13AAD	12
HARAAGA QOONDADA MIISAANIYADDA AAN LA ISTICMAALIN	12
QODOBKA 14AAD	13
MAAMULKA DEEQAHA DOWLADDA FEDERALKA LAGA HELO.....	13

QODOBKA 15AAD	13
WARBIXINADA XISAABADKA HAY' ADAHA DOWLADDA	13
QODOBKA 16AAD	14
LIFAAQYADA IYO SHAXAHA MIISAANIYADDA	14
CUTUBKA 3AAD	14
GABAGABDA.....	14
QODOBKA 17AAD	14
WAX KA BADALKA XEERKAN	14
QODOBKA 18AAD	14
XEER NIDAAMIYE	14
QODOBKA 19AAD	14
BURIN.....	14
QODOBKA 20AAD	14
DHAQANGALKA XEERKAN	14
SHAXAHA MIISAANIYADDA DOWLADDA PUNTLAND ee SANNADKA 2026	15
SHAXDA B: SOO KOOBIDA MIISAANIYADDA GUUD 2026	16
SHAXDA T: SOO KOOBIDA MIISAANIYADDA DAKHLIGA 2026.....	17
SHAXDA X: SOO KOOBIDA MIISAANIYADDA KHARASKA 2026	21
SHAXDA KH: MIISAANIYADDA QAYBAHA HAY'ADDAHA DOWLADDA 2026	22
SHAXDA 1: MIISAANIYADDA MADAXTOOYADDA 2026	24
SHAXDA 2: MIISAANIYADDA KHARASHKA GUUD DPL 2026	25
SHAXDA 3: MIISAANIYADDA GOLLAHA WAKIILADDA 2026	26
SHAXDA 4: MIISAANIYADDA WASAARADDA MAALIYADDA 2026.....	27
SHAXDA 5: MIISAANIYADDA KHARASHKA GUUD DPL 2026	28
SHAXDA 6: MIISAANIYADDA WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA 2026.....	29
SHAXDA 7: MIISAANIYADDA WASAARADDA WARFAAFINTA, H.DH. & DALXIISKA 2026	30
SHAXDA 8: MIISAANIYADDA HAY'ADDA MAAMUL WANAAGA 2026	31
SHAXDA 9: MIISAANIYADDA HANTIDHOWRKA GUUD 2026.....	32
SHAXDA 10: MIISAANIYADDA GUDIGA DOORASHOYINKA 2026	33
SHAXDA 11: MIISAANIYADDA HAY'ADDA TV-ga DOWLADDA 2026	34
SHAXDA 12: MIISAANIYADDA HAY'ADDA QANDARAAS BIXINTA 2026.....	35
SHAXDA 13: MIISAANIYADDA WASAARADDA AMNIGA IYO DDR 2026.....	36
SHAXDA 14: MIISAANIYADDA WASAARADDA CADAALADA 2026.....	37
SHAXDA 15: MIISAANIYADDA GARYAQAANKA GUUD 2026.....	38
SHAXDA 16: MIISAANIYADDA HAY'ADDA XUQUUQUL AADANAHA 2026	39
SHAXDA 17: MIISAANIYADDA GOLLAHA GARSOORKA IYO MAXKAMADDA SARE 2026.....	40

SHAXDA 18: MIISAANIYADDA XEER ILAALIYAHA GUUD 2026.....	41
SHAXDA 19: MIISAANIYADDA HAY'ADDA HSN 2026	42
SHAXDA 20: MIISAANIYADDA CIIDANKA BOOLISKA 2026	43
SHAXDA 21: MIISAANIYADDA MAXKAMADA CIIDANKA QALABKA SIDA 2026	44
SHAXDA 22: MIISAANIYADDA CIIDANKA DARAAWIISHTA 2026.....	45
SHAXDA 23: MIISAANIYADDA CIIDANKA ASLUUBTA 2026	46
SHAXDA 24: MIISAANIYADDA WASAARADDA XANAANADA XOOLAHA 2026	47
SHAXDA 25: MIISAANIYADDA WASAARADDA HOWLAHA GUUD 2026.....	48
SHAXDA 26: MIISAANIYADDA HAY'ADDA WADOOYINKA 2026.....	49
SHAXDA 27: MIISAANIYADDA WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIKA BADDA 2026.....	50
SHAXDA 28: MIISAANIYADDA WASAARADDA QORSHAYNTA 2026	51
SHAXDA 29: MIISAANIYADDA WASAARADDA GANACSIGA 2026	52
SHAXDA 30: MIISAANIYADDA RUGTA GANACSIGA 2026	53
SHAXDA 31: MIISAANIYADDA WASAARADDA TAMARTA, MACDANTA IYO BIYAHA 2026	54
SHAXDA 32: MIISAANIYADDA WAKAALADDA HORUMARINTA BIYAHA 2026	55
SHAXDA 33: MIISAANIYADDA WAKAALADDA HORUMARINTA KORONTADA 2026.....	56
SHAXDA 34: MIISAANIYADDA HAY'ADDA MAAREYNTA XOGTA BIYAHA 2026.....	57
SHAXDA 35: MIISAANIYADDA WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBADELKA CIMILADA 2026	58
SHAXDA 36: MIISAANIYADDA WASAARADDA DUULISTA HAWADA 2026	59
SHAXDA 37: MIISAANIYADDA WASAARADDA KALUUMAYSIGA IYO KH. BADDA 2026	60
SHAXDA 38: MIISAANIYADDA HAY'ADDA XIRIIRKA JAALIYADAHA 2026.....	61
SHAXDA 39: MIISAANIYADDA WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA 2026.....	62
SHAXDA 40: MIISAANIYADDA WASAARADDA CAAFIMAADKA 2026	63
SHAXDA 41: MIISAANIYADDA HAY'ADDA FORONSIK SAYNIS 2026	64
SHAXDA 42: MIISAANIYADDA WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE 2026	65
SHAXDA 43: MIISAANIYADDA WASAARADDA SHAQADA IYO ARIMAHA BULSHADA 2026...66	
SHAXDA 44: MIISAANIYADDA WASAARADDA DHALINYADDA IYO CAYAARAHA 2026	67
SHAXDA 45: MIISAANIYADDA WASAARADDA HORUMARINTA HAWEENKA IYO ARIMAHA QOYSKA 2026.....	68
SHAXDA 46: MIISAANIYADDA WASAARADDA GARGAARKA 2026	69
SHAXDA 47: MIISAANIYADDA HAY'ADDA LA DAGAALANKA HIV/AIDS (PAC) 2026.....	70
SHAXDA 48: MIISAANIYADDA HAY'ADDA DARYEELKA BULSHADA 2026	71
SHAXDA 49: MIISAANIYADDA SHAQAALAHAYIDKA 2026	72
SHAXDA 50: MIISAANIYADDA MASHAARIICDA BAANKA ADJUNKKA 2026	73
SHAXDA 51: MIISAANIYADDA MASHRUUCA DOWLAD KAAB 2026.....	74

SHAXDA 52: MIISAANIYADDA DOWLADAHA HOOSE (DAKHLIGA) 2026	75
SHAXDA 53: MIISAANIYADDA DOWLADAHA HOOSE (KHARASHKA) 2026	76
SHAXDA 54: MIISAANIYADDA HAY'ADAHA CAALAMIGA AH, UN-ka IYO BANGIGA HORUMARINTA AFRICA 2026.....	77
SHAXAHA CASHUURAHHA BERRIGA SANNADKA 2026	78
WASAARADDA MAALIYADDA CASHUURAHHA BERRIGA.....	79
Shaxda 3.1 Cashuurta Faa'idada macaashka ganacsiga iyo xirfadlayaasha	79
Shaxda 3.2 Cashuurta Qiyaasta Dakhliga	79
Shaxda 3.3 Cashuurta Dakhliga gaadiidka xamuulka.....	79
Shaxda 3.4 Cashuurta Dakhliga ee wax soo saarka beeraha	79
Shaxda 3.5 Cashuurta macaashka saamiyada	79
Shaxda 3.6 Howlo shaqo ee Mar qaadka ah ee Madaganayaasha ah	79
Shaxda 3.7 Cashuurta Dakhliga kirooyinka.....	79
Shaxda 3.7 Cashuurta Dakhliga Shaqada.	79
Shaxda 3.8 Gunooyinka aan lacagta ahayn (Benefits inkind).....	79
Shaxda 3.9 Dakhliiyadda taakulooyinka	80
Shaxda 3.11 Cashuurta dakhliga xoogsatada.....	80
Shaxda 3.11 Cashuurta gunada gudiyada sare	80
Shaxda 3.12 Qiime dhaca hantida (Depreciation)	80
Shaxda 3.13 cashuurta fasaxa isticmaalka lahaanshaha (Royalty) ee khayraadka dabiiciga ah	80
Shaxda 4.1 Cashuurta dakhliga shirkaddaha	80
Shaxda 5.1 Cashuurta dheefta Hantida.....	80
Shaxda 6.1 Cashuur ka Haynta ma deggenayaasha	80
Shaxda 6.2 Cashuur ka Haynta fasaxa isticmaalka lahaanshaha (Royalty) ee ganacsiyadda ma degganayaasha.....	80
Shaxda 6.3 Cashuur ka Haynta soo dajiyayaasha (Importers)	80
Shaxda 6.4 Cashuur ka Haynta qandaraasyadda.....	81
Shaxda 7.1 Cashuurta Diiwaangelinta.....	81
Shaxda 7.2 Cashuurta Diiwaangelinta kala wareejinta hantida	81
Shaxda 7.3 Cashuurta Diiwaangelinta kala wareejinta Gaadiidka	81
Shaxda 7.4 Cashuurta Diiwaangelinta hantidda ma guurta ah ee hibadda,dhaxalka ama dhulka qofka ugu horeyey lahaanshihiisa.	81
Shaxda 8.1 Cashuurta Gadista.	81
Shaxda 9.1 Cashuurta Waddo marista.	82
Shaxda 9.2 Cashuurta badqabka gaadiidka (Kala-weto).....	82

Shaxda 10.1 Cashuurta moorka ee go'aanada madaniga ah	82
Shaxda 10.2 Cashuurta moorka ee go'aanada Maamulka.	82
Shaxda 10.3 Cashuurta moorka ee go'aanadda Garsoorka.....	83
Shaxda 10.4 Cashuurta moorka ee go'aanadda iyo qoraaladda ajnabiga ah.....	83
Shaxda 10.5 Cashuurta moorka ee Manifestooyinka doonyaha iyo dayuuradaha ..	83
Shaxda 10.6 Cashuurta moorka ee boqolleyda ah.	83
Shaxda 11.1 Ganaaxyadda Cashuuraha.....	83
GARSOORKA.....	83
Shaxda 11.2 Ajuurooyinka Maxkamadda	83
WASAARADDA HOWLAHA GUUD IYO GAADIIDKA.....	84
Shaxda 11.3 Ajuurooyinka Wasaaradda Howlaha Guud.	84
WASAARADDA SHAQADDA IYO ARIMAHA BULSHADDA.....	85
Shaxda 11.4 Ajuuradda Ogolaanshaha shaqada (Work permit).....	85
LAANTA SOCDAALKA IYO JINSIYADHA SOOMAALIYA.....	85
Shaxda 11.5 Ajuurooyinka Laanta Socdaalka	85
WASAARADDA CADAALADDA, DIINTA IYO DHAQANCALINTA	86
Shaxda 11.6 Ajuurooyinka Wasaaradda Cadaaladda	86
WASAARADDA KALLUUMAYSIGA IYO KHAYRAADKA BADDA	86
Shaxda 11.7 Shatiga Doonyaha Iyo Maraakiibta Kaluumaysiga	86
WAKAALADDAHA BIYAHA.....	87
Shaxda 11.8 Shatiga Riigaga Iyo Shirkadaha Dhismaha Biyaha.....	87
WASAARADDA QORSHAYNTA, DHAQAALHA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA.....	87
Shaxda 11.9 Shatiyadda Hayaddaha.....	87
WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA.....	87
Shaxda 11.10 Ajuurooyinka Diyaaraddaha	87
Shaxda 11.11 Ajuurooyinka Ganacsiga.....	88
Shaxda 11.11.2 KHIDMADDA SUMADHA GANACSIGA	93
WASAARADDA WARFAAFINTA, HIDAHA, DHAQANKA IYO DALXIISKA.....	95
Shaxda 11.12 Ajuurooyinka Wasaaradda Isgaarsiinta.	95
WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA	97
Shaxda 11.13 Ajuurooyinka wasaaradda Beeraha	97
WASAARADDA DEEGAANKA, DAAQ IYO ISBADELKA CIMILADA.....	97
Shaxda 11.14 Ajuurooyinka Wasaaradda Deegaanka	97
HAY'ADDA QANDARAAS BIXINTA	98
Shaxda 11.15 Shatiga Qandaraaslayaasha	98
WASAARADDA TAMARTA,MACDANTA IYO BIYAHA	98

Shaxda 11.16 Shatiyadda Macdanta	98
WASAARADDA AMNIGA	99
Shaxda 11.17 Adeegyadda Wasaaradda Amniga.....	99
WASAARADDA CAAFIMAADKA.....	99
Shaxda 11.18 Ogolaanshaha Guddiga Xifadlayaasha Caafimaadka Puntland	99
Shaxda 11.19 Haama Oxygenta	100
CIIDAMADDA ILAALINTA WADOOYINKA (TRAFFIC)	100
Shaxda 11.20 Ganaaxyada Darawalada iyo Gaadiidka Icticmaala Waddooyinka .	100
WASAARADDA GAADIIDKA BADDA IYO DEKADDAHA.....	101
Shaxda 11.21 Khidmadda wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekaddaha	101

GUUD MARKA MIISAANIYADDA 2026

Miisaaniyada waa xeer qeexayaa dhammaan Dakhliga Dowladda filayso in ay hesho sanad-maaliyadeedka iyo dhammaan kharashyadda ay damacsantahay in bixiso si loogu fuliyo qorshayaasha Dowladda si waafaqsana Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 135aad.

Qaab-dhismeedka Miisaaniyaddu waa hab muujinaya sidii loo fulin lahaa siyaasadda iyo wax qabadka Dowladda, Muhiimada Miisaaniyaddu waa in la diyaariyo siyaasad Dowladdu ku gaari karto hiigsigeeda muddada dhow iyo tan dhexe, ayadoo la muujinayo ku talagalka dhaqaale ee la soo xareyn karo iyo qoondada kharashaadka lagu gaarayo yoolasha Dowladda.

Siyaasadda Dowladdu waa in kharashaadka la geli doono lagu saleeyo Dakhliga la Soo xareyn karo, si loo waafajiyo siyaasadda Dowladda.

Maadaama Dowladdu aysan wada dabooli karin baahiyaha kharashaadka joogtada ah iyo kuwa raasumaalka ah ee loo baahan yahay, Siyaasadda Dowladu waa in bixinta kharashaadka loo kala horreysiiyo siday u kala mudanyihiin. Ayadoo la tix raacayo Xeerka Qoondada Miisaaniyada 2026, sida Mushaharaadka, Raashinka, Gunooyinka iyo adeegyadda kale.

Miisaaniyad 2026 ee Dawladda Puntland waxay ka koobantahay Dakhli lagu maamulaayo khasnadda Dawladda (on budget) iyo dakhli ka baxsan khasnadda Dawladda (off budget). Miisaaniyadda sannadka 2026 waxay noqonaysa wadarta guud **\$ 315,783,344**

Dakhliga gudaha Sannadka 2026 waxaa uu noqonaya **\$ 117,612,300** oo bishii ku qoondaysan **\$ 9,801,025**

Dakhligaan oo ku soo xaroonayaa saddex iyo toban madax oo ka kala imaanayaa dhammaan gobollada Puntland.

Miisaaniyad Sannadka 2026 waxaa ku jira kab miisaaniyadeed wadar ahaan dhan **\$22,541,685** oo bishii ku qoondaysan **\$ 1,878,474.**

Dakhliyadda kale oo laga maamulayo khasnadda dowladda oo kala ah, Mashruuca Dawlad Kaab (Ex JPLG) iyo mashaariicda Bangiga aduunka oo wadar ahaan dhan **\$39,495,472**

Dakhliyadda Ka baxsan Khasnadda dowladda ee kala ah Mashruuca Hormarin Bankiga Africa, Mashaariicda Qaramada Midoobay, Hay'addaha caalamiga iyo dawladaha hoose oo wadar ahaan dhan ah **\$ 136,133,887**

Miisaaniyaddan ayaa ah kuwo ay maamulaan hay'adaha ay qusayso, kuna qabtaan mashaariic horumarineed kuwaasoo u qoondaysan.

Kharashka gudaha Sannadka 2026 waxaa uu noqonayaa **\$ 140,153,985** oo bishii ku qoondaysan **\$ 11,679,499** kharashkaan ayay Dawladdu ku maarayn doonta todobo madax kuwaas oo ay wadaagayaal ka yihiin Hay'addaha Amniga & cadaaladda, Maamulka, kobicinta dhaqaalaha iyo Doorashooyinka.

Hal ku dhiga Miisaaniyadda 2026

"Difaac iyo Horumar"

XEERKA QOONDADA MIISAANIYADDA DOWLADDA PUNTLAND SANNADKA 2026

CUTUBKA 1AAD

QODOBO GUUD

QODOBKA 1-AAD

MAGACA XEERKA

Xeerkaan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda Sannadka 2026.

QODOBKA 2-AAD

ERAY BIXIN

Hadii aan si kale loogu fasirin Xeerkan arayadan soo socda waxaa loo macnaynayaa sidaan soo socota;

DPL:	Waxaa loola jeeda Dowladda Puntland.
Hantidhawr:	Waxaa loola jeeda Xafiiska hantidhawraha guud ee DPL.
Wasiir:	Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Puntland
Xisaabiye Guud:	Waxaa loola jeeda Xisaabiyaha Guud ee DPL.
Agaasime Guud:	waxaa loola jeeda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.
Saraakiisha idman:	Waxaa loola jeeda saraakhisha idman sida ku cad Qodobka 13aad ee Sharci Lr.09 sharciga Maamulka Maaliyda Guud ee DPL.
Wasaarad:	Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Puntland.
Xeer:	Waxaa loola jeedaa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda 2026.
Kala-wareejin:	Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha kala wareejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejinayo madax, madax-xige, farac ama mashruuc loona wareejiyo madaxyo kale.
Qaansheegad:	Waxaa loola jeedaa dalabka shirkadaha ama shaqsiyaadka Dowladda siiya adeeg ama agab.
Ansixin:	Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha Gollaha Wakiillada ee fulinta Miisaaniyadda DPL.
Qoondeyn:	Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha Wasiirka ee kharash si waafaqsan Miisaaniyadda Golaha Wakiilladu ansixiyey.
Ballanqaad:	Waxaa loola jeedaa fulinta heshiis marka la galo.
Daymo	deymaha ka soo wareegay miisaaniyadda sannadka 2025.
Deeq	Waxaa loola jeeda lacagaha deeqaha ah ee laga helo mashaariicda ama kaalmooyinka kale ee Dowladdu hesho.
PLFMIS	Waxaa loola jeeda Puntland Financial Management Information System
Sharci Lr.9	Waxaa loola jeeda sharciga Maamulka Guud ee Maaliyadda DPL ee soo baxay 15-Aug- 2023.
Golayaasha: DPL	Waxaa loo jeeda Gollaha Xukumaada, Gollaha Garsoorka iyo Gollaha Wakiiladda Dawladda Puntland.

QODOBKA 3-AAD

UJEEDADA XEERKAAN

Ujeeda Xeerkaan waa: -

1. In Wasaaradda Maaliyaddu diyaariso Xeerka Qoondada Miisaaniyadda 2026 si waafaqsan **Qodobka 135^{aad} (4)** ee Dastuurka DPL iyo **Qodobada 14^{aad}, 15^{aad} iyo 16^{aad} ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud ee DPL Sharci Lr.9/2023**, si loo jaangooyo dakhliga iyo kharashaadka Dowladda loona dhaqan galiyo Miisaaniyad sannadeedka 2026.
2. In Wasiirka lagu awood siiyo inuu fasaxo ama ka saari karo khasnada guud ee dowladda lacagta qoondada Miisaaniyadda oo dhan **USD 179,649,457** markii ay codsadaan Hay'adaha Dawladda ee ay Quseyso si waafaqsan Miisaaniyadda.
3. In la mideeyo dhammaan miisaaniyadda joogtada ah iyo mida raasumalka ah ee DPL.

QODOBKA 4-AAD

BAAXADA AWOODA XEERKAN

Baaxada iyo Awooda Xeerkan waxay ku fidsantahay Guud ahaan soohdimaha Dawladda Puntland ee Soomaliyeed.

CUTUBKA 2-AAD

MAAMULKA MIISAANIYADDA DPL

QODOBKA 5-AAD

MASUULIYADDA MAAMULKA IYO DHAQANGALINTA MIISAANIYADDA

1. Maamulka iyo fulinta miisaaniyadda Dowladda Puntland waa masuuliyad wadareed sida ku cad **Qodobka 134^{aad} ee Dastuurka Dowladda Puntland**.
2. Wasiirka ayaa leh Masuuliyadda guud ee fulinta siyaasada Miisaaniyadda DPL si waafaqsan **Qodobka 27^{aad} Farqada 1^{aad} iyo 2^{aad}** ee sharciga Maamulka Maaliyadda DPL **Sharci Lr.9/2023** waana u wakiilan karaa masuuliyadiisa cid kale guud ahaan ama gaar ahaan.
3. Saraakiisha idman ee Dowladda ayaa farsamo ahaan masuul ka ah in si sax ah loo dhaqangaliyo Miisaaniyadda Dowladda sida ku xusan **Qodobka 27^{aad} farqada 3^{aad}** ee sharciga Maamulka Maaliyadda DPL **Sharci Lr.9/2023**.

QODOBKA 6-AAD

QOONDADA MIISAANIYADDA DPL EE SANNADKA 2026

Wasaradda Maaliyadda Dowladda Puntland waxay u qoondeeysay Miisaaniyadda sannadka 2026 Miisaaniyad dhan **USD. 179,649,457**.

QODOBKA 7-AAD

MUDNAANTA KHARASH BIXINTA DOWLADDA

Hadii ay timaado hoos u dhac dakhliga ka soo xarooda gudaha DPL ama la waayo deeqaha la filayo Wasaaradda Maaliyadda DPL ay fulin waydo bixinta kharashaadka ku jira qoondada Miisaaniyad sanadeedka 2026 waxay Wasaaradu u raacaysaa mudnaanta kharash bixinta sida hoos ku xusan: -

- Mushaharka, Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida.
- Mushaarooyinka iyo Gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
- Gunnada iyo Adeega Golayaasha Dowladda.
- Mushaharka iyo gunooyinka daymaha iyo kharaashka kale ee ka soo wareegay miisaaniyada sanadkii hore 2025.
- Kharashka Adeegga iyo Agabka Hay'adaha Dowladda.

QODOBKA 8AAD

QABASHADA DAKHLIGA DOWLADDA IYO BIXINTA KHARASHKA

1. Dhammaan dakhliyada DPL waxaa kaliya oo lagu xaraynayaa xisaabta khasnada midaysan ee ka furan Bangiga DPL sida ku cad **Qodobka 42^{aad} Farqada 3^{aad}** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda DPL sharci **Lr.9** guud ahaan kharshaadka Dalkana waxa laga saarayaa isla khasnadaas.
2. Wasaaradda Maaliyadda DPL ama hay'adaha kale ee farsamo ahaan u qabta dakhli dowladeed waaa in ay mudo 24 saac gudahood ah ugu gudbiyaan khasanada dhexe dowladda oo ka furan Bangiga DPL sida ku cad **Qodobka 1^{aad}** ee Xeer **Lr.MW/DPS/MM/99 ee Luulyo 10/1999 Xeerka** u gudbinta dakhliga DPL ee la qabto 24 saac gudahood khasnada dhexe.
3. Bangiga DPL waxaa waajib ku ah fududaynta qabashada dakhliga Dowladda ee soo maray hanaanka dakhli xaraynta Wasaaradda Maaliyadda iyo bixinta kharaashadka Dowladda ee laga saarayo khasnada guud waana in uu u bixiyaa sida ay u amreen Xisaabiyaha guud iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda sida uu qabo **Qodobka 33^{aad} farqadiisa 3^{aad}** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda DPL.
4. Dhammaan dhaq-dhaqaaqyada xaraynta dakhliga iyo bixinta kharashyada waa in la mariyaa nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Puntland (PLFMIS) waxaana reeban in la qabto dakhli ama la bixiyo kharash aan marin hanaanka PLFMIS.

QODOBKA 9AAD

HABRAACA LACAG KA SAARIDA KHASNADA GUUD EE DPL

1. Waxaa reeban in Khasanada Guud ee Dowladda Puntland laga saaro wax kharash ah iyadoo aan Golaha Wakiiladda DPL aysan ansixin Miisaaniyadda.
2. Wax kharash ah lama gali karo ka hor inta aan la ansixin Miisaaniyadda DPL 2026.
3. Saraakhiisa Wasaaradda Maaliyadda ee qaabilsan lacag bixinta waa in ay hubiyaan in lacagaha laga saarayo khasnada guud ee DPL in ay leeyihin qoraalada taageeraya lacag bixinadaas (Support Document).

4. Xisaabiyaha Guud ee DPL waa in uu hubiyaa in lacag bixin kasta oo la ogolaaday in ay ku lifaaqan yihiin qoraalada kaabaya sida ku cad **Qodobka 33aad Farqadiisa 4aad** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda guud sharci **Lr.9/2023**
5. Kharash kasta oo laga saarayo khasnada guud ee DPL waxaa loo diri karaa kaliya cida iska leh kharashkaas Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Guud waa inay hubiyaan in lacag bixin kasta waa faqsan tahay habraaca lacag bixinta DPL.

QODOBKA 10AAD

KALA WAREEJINTA MIISAANIYADDA DPL

1. Wasiirka Maaliyadda kaliya ayaa oggolaan karaa kala wareejinta Miisaaniyadda joogtada ah ee aan rasumaalka ahayn ee hal Hay'ad dowladeed ka dib marka hay'addu soo codsato iyadoo soo raacinaysa qoraal sababaysan.
2. Dhammaan kala wareejinta hay'adaha ee sanad maaliyadeedka waa in ay ka badan 10% qoondada kharashka ee hay'ad kasta.
3. Waxaa reeban in lacag laga wareejiyo Madax mushahar iyadoo loo wareejinayo madax kharash kale.
4. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu lacagaha kabka deeqaha u wareejin karo madaxyada kharash bixinta mudnaanta u leh sanad Miisaaniyadeed kaas.
5. Wasiirku Wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda kaydka ah loo wareejiyo kharash bixin deg deg ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmada deg deg ah u baahan.

QODOBKA 11AAD

KABKA MIISAANIYADDA

Golaha wakiilada oo ka duulaya talo bixinta Wasaarada Maaliyadda ayaa ansixinaya miisaaniyad kasta oo kab ah oo aan qoondada ku jirin.

QODOBKA 12AAD

DAYMAHA SHARCIGA AH IYO AMAAHDA DAWLADA

1. Daymaha sharciga ah ee laga dhaxlay miisaaniyadda 2025 waxay noqonayaan dayn u wareegaysa Miisaaniyadda sannadka 2026 waxayna ka mid noqonayaan kharash bixinta Miisaaniyadda 2026 markii awood loo helo, Wasiirka iyo Agaasimaha Guud ayaana u xilsaaran xaqiijinta iyo bixinta daymahaas.
2. Wasiirka oo kaliya ayaa iska leh awooda dayn qaadashada amaahda Gudaha sida uu qabo **Qodobka 35aad** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda DPL **sharci Lr.9/2023**.

QODOBKA 13AAD

HARAAGA QOONDADA MIISAANIYADDA AAN LA ISTICMAALIN

1. Dhammaan lacagaha la qoondeeyey ee aan la isticmaalin miisaaniyadda 2026 waxay dhacayaan dhamaadka sannadka sida ku xusan **Qodobka 35aad** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda **Sharci Lr.9/2023**
2. Haraayada miisaaniyadda ee la qoondeeyey ee aan la isticmaalin waxa loo wareejinayaa sanad maaliyadeedka xiga waxaana lagu shubayaa khasnada Dowladda.

QODOBKA 14AAD

MAAMULKA DEEQAHA DOWLADDA FEDERALKA LAGA HELO

1. Deeqaha la filayo in laga helo Mashaaricda Dowladda Federalka ah waxaa aasaas u noqonaya heshiis ay wada galaan Dowladda Puntland iyo Dowladda Federalka ah.
2. Dhammaan lacagaha deeqaha ah waxaa lagu maamulayaa shuruucda Dowladda Puntland waxaana maamulaya hay'adaha kala duwan ee Dowladda ay quseeyso deeqdu.
3. Heshiisyada deeqaha dibada waxaa Dowladda Puntland u gudoomaya una saxiixaya Wasaaradda Maaliyadda DPL sida ku cad Qodobka **8aad** ee **sharci Lr.4/2005**
4. Dhammaan hay'adaha deeqaha ka hela dibada loona soo dhexmariyo miisaaniyadda Dowladda iyo kuwa aan loo soo marinba waxaa waajib ku ah in ay u soo gudbiyaan heshiisyada deeqahaas Wasaaradda mudo 14 casho gudahood ah ka dib xiliga ay galeen sida uu qabo **Qodobka 38^{aad}** ee sharci Maamulka Maaliyada Guud ee DPL **sharci Lr.9/2023**

QODOBKA 15AAD

WARBIXINADA XISAABADKA HAY' ADAHA DOWLADDA

1. Guud ahaan Hay'adaha Dowladda waxaa waajib ku ah in ay u hogaansamaan habraacyada iyo halbeegyada xisaabadka iyo hantidhawrida Dowladda si loo ilaaliyo hantida Dowladda waana in ay u isticmaalaan xisaabtooda nidaamka PLMIS ka ee Dowladda sida uu qabo **Qodobka 43^{aad} farqadihiisa 1,3 iyo 4^{aad}** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda DPL **sharci Lr.9/2023**.
2. Dhammaan hay'adaha dowladda ee Miisaaniyada ku leh qoondo waxaa waajib ku ah in ay u soo gudbiyaan Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
3. Dhammaan saraakiisha idman ee Dowladda waxaa waajib ku ah in ay bil walba u soo gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda gaar ahaan xafiiska Xisaabiyaha guud iyo Agaasimaha Miisaaniyadda ugu danbayn 7 bisha xigta iyagoo raacaya habraacyda Wasaaradda Maaliyadu samaysay sida ku cad **Qodobka 45^{aad}** ee Sharciga Maamulka Maaliyadda DPL **sharci Lr.9/2023**.
4. Wasaaradda waxaa waajib ku ah in ay xisaab xirka sanad maaliyadeedka dowladda oo dhan ay horgayso golaha wakiilada ugu danbayn 30-ka Juun sanad ka xiga sanad Maaliyadeedkasta si ay uga doodaan si waa faqsan **Qodobka 137^{aad}** Farqadiisa 1^{aad} ee Dastuurka DPL.
5. Xisaabiyaha Guud ee Dowladda waxaa waajib ku ah in uu diyaariyo warbixin maaliyadeed aan baaris marin una gudbiyo hantidhawraha guud mudo aan 4 bilood ka badnayn dhamaadka sanad maaliyadeed kasta waana in uu ku daabacaa mareegta Wasaaradda Maaliyadda si shacabku u arkaan sida uu qabo **Qodobka 46^{aad} farqadiisa 2^{aad} ee sharciga Maamulka Maaliyadda Guud Sharci Lr.9 ee soo baxay 15-Aug-2023**.
6. Hanti-dhawraha waxaa waajib ku ah in uu baaris ku sameeyo hay'adaha dowladda ugu yaraan hal mar sanadkii sidoo kale waa in uu warbixinada sanad maaliyadeedka guud ee loo gudbiyo ku sameeyaa baaris una gudbiyaa Golaha wakiillada warbixita baarista oo ay ku lifaaqantahay warbixin sanad maaliyadeedka ugu danbayn 2 bilood gudahood ka dib xiliga warbixintu soo gartay sida ku xusan **Qodobka 46^{aad} faraqadaha 4^{aad} iyo 5^{aad}** ee sharciga maamulka Maaliyadda Sharci **Lr.9/2023**.

QODOBKA 16AAD

LIFAAQYADA IYO SHAXAHA MIISAANIYADDA

Miisaaniyada DPL ee sannadka 2026 waxaa raacaya lifaaqyada iyo shaxaha soo socda

1. Lifaaqa warbixinta haykalka siyaasada maaliyadda DPL.
2. Lifaaqa qoondada iyo faah-faahinta dakhliga la filayo iyo qoondooyinka iyo warbixin ay ku jiraan natijadda isbedelka miisaaniyadda sannadkii tagay iyo sannadka soo socda.
3. Lifaaq si kooban loogu muujinaya shaxaha cashuuraha ee sannadka soo socda iyo isbadalada tacriifooyinka cashuuraha bariga si waafaqsan **qodobka 113aad** ee xeerka cashuuraha berriga DPL **Ir.11/2023**.
4. Lifaaq soo koobaya kharashka hay'adaha madaxa bannaan iyo Wasaaraddaha, oo tilmaamayana qoondada miisaaniyadda Dawladda laga siinayo.
5. Lifaaq si kooban u tilmaamaya dhammaan lacagaha laga helo deeq bixiyeyaasha, isagoo kala saaraya lacagaha loogu talo galay Dawladda Puntland iyo meelaha kale.

CUTUBKA 3AAD

GABAGABDA

QODOBKA 17AAD

WAX KA BADALKA XEERKAN

Xeerkaan waxaa lagu samayn karaa wax ka badal iyo kaabis waxaana loo marayaa habraaca wax ka badalka xeerarka Dawladda Puntland.

QODOBKA 18AAD

XEER NIDAAMIYE

Si ay u fududaato dhaqangalinta Xeerkaan Wasaaradda Maaliyadda DPL waxaay soo saari kartaa xeer nidaamiyaal lagu fasirayo xeerkan.

QODOBKA 19AAD

BURIN

Waxaa la buriyey xeer kasta oo aan la jaanqaadi Karin Xeerkan.

QODOBKA 20AAD

DHAQANGALKA XEERKAN

xeerkan wuxuu dhaqan galayaa Marka Golaha Wakiiladdu ansixiyo, Madaxwaynuhuna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland

**SHAXAHA
MIISAANIYADDA
DOWLADDA
PUNTLAND ee
SANNADKA 2026**

SHAXDA B: SOO KOOBIDA MIISAANIYADDA GUUD 2026

MIISAANIYADDA SANNADKA 2026				
Soo Koobida Dakhliga				
Madax	Faah-Faahin	Miisaaniyadda sannadka 2025	Miisaaniyadda sannadka 2026	Qiyaas Bileed 2026
111	Cashuuraha dakhliga, faaidada iyo Macaashka	\$ 760,104	\$ 775,944	\$ 64,662
112	Cashuurta mushaarka iyo xoogsatada	\$ 6,051,624	\$ 5,076,924	\$ 423,077
113	Cashuurta hantida (Dhaxalka)	\$ 19,164	\$ 23,064	\$ 1,922
114	Cashuurta allaabada iyo adeega	\$ 16,416,228	\$ 22,868,699	\$ 1,905,725
115	Cashuurta Dhoofinta iyo soo dejinta (export & Import)	\$ 60,953,136	\$ 61,456,451	\$ 5,121,371
116	Cashuuraha kale (Boolo)	\$ 2,726,256	\$ 3,018,456	\$ 251,538
121	Qaaraanka bulshada	\$ 696,372	\$ 956,352	\$ 79,696
142	Dakhliga Hantida (Kirooyinka)	\$ 13,173,888	\$ 22,243,406	\$ 1,853,617
143	Ganaaxa iyo ciqaabta	\$ 263,232	\$ 274,032	\$ 22,836
144	Wareejinada	\$ 940,416	\$ 918,972	\$ 76,581
	Wadarta Dakhliga Gudaha	\$ 102,000,420	\$ 117,612,300	\$ 9,801,025
133	Kabka miisaaniyadda	\$ 22,541,685	\$ 22,541,685	\$ 1,878,474
134	Mashaariicda bangiga aduunka	\$ 23,971,695	\$ 34,495,472	\$ 2,874,623
135	Mashruuca Dawlad Kaab (Ex JPLG)	\$ 2,000,000	\$ 5,000,000	\$ 416,667
136	Mashruuca Bangiga horumarinta Africa	\$ -	\$ -	\$ -
	Wadarta Dakhliga kale ee khasnada	\$ 48,513,380	\$ 62,037,157	\$ 5,169,763
	Wadarta guud ee miisaaniyada khasnada	\$ 150,513,800	\$ 179,649,457	\$ 14,970,788
	Miisaaniyada ka baxsan khasnada(off Budget)			
	Mashruuca Bangiga horumarinta Africa	\$ 600,000	\$ 600,000	\$ 50,000
	Miisaaniyadda Dawladaha hoose 18 Degmo	\$ 12,190,354	\$ 14,344,882	\$ 1,195,407
	Hay'adaha qaramada midoobey(UN)	\$ 79,292,347	\$ 15,622,089	\$ 1,301,841
	Ururada caalamiga(INGO's/LNGO's)	\$ 224,244,261	\$ 105,566,916	\$ 8,797,243
	Wadarta Miisaaniyada ka baxsan khasnada	\$ 316,326,962	\$ 136,133,887	\$ 11,344,491
	Wadarta guud ee miisaaniyada	\$ 466,840,762	\$ 315,783,344	\$ 26,315,279
Soo Koobida Kharashka 2026				
Madax	Faah-Faahin	Miisaaniyadda sannadka 2025	Miisaaniyadda sannadka 2026	Qiyaas Bileed 2026
21	Xaquuqda Ciidamada, Shaqaalaha & Goloyaasha	\$ 67,092,179	\$ 77,692,739	\$ 6,474,395
22	Isticmaalka Alaabta iyo Adeegyadda	\$ 37,188,402	\$ 43,988,622	\$ 3,665,719
27	Gunno sharadeed, Magdhawayada & Kaalmooyinka	\$ 3,492,000	\$ 3,132,000	\$ 261,000
28	Kharashadka kale (Wareejinadda)	\$ 406,800	\$ 633,600	\$ 52,800
29	Lama filaanka	\$ 942,197	\$ 775,025	\$ 64,585
31	Kaabayaasha Dhaqaalaha iyo dhismaha	\$ 15,420,528	\$ 13,932,000	\$ 1,161,000
	Wadarta Kharashka Gudaha	\$ 124,542,105	\$ 140,153,985	\$ 11,679,499
134	Mashaariicda Bangiga Aduunka	\$ 23,971,695	\$ 34,495,472	\$ 2,874,623
135	Mashruuca Dawlad Kaab (Ex JPLG)	\$ 2,000,000	\$ 5,000,000	\$ 416,667
136	Mashruuca Bangiga horumarinta Africa	\$ -	\$ -	\$ -
	Kharashka kale ee Khasnada	\$ 25,971,695	\$ 39,495,472	\$ 3,291,289
	Wadarta guud ee miisaaniyada khasnada	\$ 150,513,800	\$ 179,649,457	\$ 14,970,788
	Miisaaniyada ka baxsan khasnada(off Budget)			
	Mashruuca Bangiga horumarinta Africa	\$ 600,000	\$ 600,000	\$ 50,000
	Miisaaniyadda Dawladaha Hoose 24 Degmo	\$ 12,190,354	\$ 14,344,882	\$ 1,195,407
	Hay'adaha qaramada midoobay (UN)	\$ 79,292,347	\$ 15,622,089	\$ 1,301,841
	Ururada caalamiga(INGO's/LNGO's)	\$ 224,244,261	\$ 105,566,916	\$ 8,797,243
	Wadarta Miisaaniyada ka baxsan khasnada	\$ 316,326,962	\$ 136,133,887	\$ 11,344,491
	Wadarta guud ee miisaaniyada	\$ 466,840,762	\$ 315,783,344	\$ 26,315,279

SHAXDA T: SOO KOOBIDA MIISAANIYADDA DAKHLIGA 2026

SOO KOOBIDA DAKHLIGA					
MIISAANIYADDA SANADKA 2026					
Madax	FAAH-FAAHIN	Heads	W. SANNADKA 2025	W. SANNADKA 2026	Qiyaas Bileed 2026
1	Dakhliga	Object Category	\$ 124,542,105	\$ 140,153,985	\$ 11,679,499
11	Cashuuraha	Object Type	\$ 86,926,512	\$ 93,219,538	\$ 7,768,295
111	Cashuuraha dakhliga, faaidada iyo raasumaalka	Object Classification	\$ 760,104	\$ 775,944	\$ 64,662
1111	Cashuurta loo bixiyo qof-qof	Object Group	\$ 103,044	\$ 104,244	\$ 8,687
111101	Cashuurta Faaidad xirfadlayaasha	Object	\$ 103,044	\$ 104,244	\$ 8,687
1112	Macaashka ganacsiga	Object Group	\$ 657,060	\$ 671,700	\$ 55,975
111201	Faaidada ganacsiga Waawayn	Object	\$ 18,156	\$ 26,796	\$ 2,233
111202	Faaidada wakaaladaha	Object	\$ -	\$ 8,400	\$ 700
111203	Faaidada Qiyaasta	Object	\$ 626,904	\$ 622,104	\$ 51,842
111204	Faaidada ganacsiga Dhexe	Object	\$ 12,000	\$ 14,400	\$ 1,200
112	Cashuurta mushaarka iyo xoogsatada	Object Classification	\$ 6,051,624	\$ 5,076,924	\$ 423,077
1121	Cashuurta mushaarka shaqaalaha Dawlada	Object Group	\$ 1,817,652	\$ 1,824,696	\$ 152,058
112101	Cashuurta mushaarka shaqaalaha rayidka	Object	\$ 645,036	\$ 684,096	\$ 57,008
112102	Cashuurta mushaarka ciidamada	Object	\$ 1,172,616	\$ 1,140,600	\$ 95,050
1122	Cashuurta mushaarka shaqaalaha aan Dawliga ahayn	Object Group	\$ 4,233,972	\$ 3,252,228	\$ 271,019
112201	Cashuurta mushaarka shaqaalaha G/Waawayn	Object	\$ 420,456	\$ 411,036	\$ 34,253
112202	Cashuurta shaqaalaha Hay'addaha	Object	\$ 3,185,400	\$ 2,107,200	\$ 175,600
112204	Cashuurta xoogsatada	Object	\$ 163,692	\$ 156,744	\$ 13,062
112206	Cashuurta mushaarka shaqaalaha G/Dhexe	Object	\$ 134,424	\$ 237,648	\$ 19,804
112207	Cashuurta shaqaalaha suuqa	Object	\$ 330,000	\$ 339,600	\$ 28,300
113	Cashuurta hantida	Object Classification	\$ 19,164	\$ 23,064	\$ 1,922
1131	Cashuurta hantida	Object Group	\$ 19,164	\$ 23,064	\$ 1,922
1133	Cashuurta dhaxalka iyo hibadda	Object Group	\$ 19,164	\$ 23,064	\$ 1,922
113301	Cashuurta dhaxalka iyo hibadda	Object	\$ 19,164	\$ 23,064	\$ 1,922
114	Cashuurta allaabada iyo adeega	Object Classification	\$ 16,416,228	\$ 22,868,699	\$ 1,905,725
1141	Cashuuraha guud ee allaabada iyo adeega	Object Group	\$ 14,079,360	\$ 20,036,484	\$ 1,669,707
114101	Cashuurta qiimaha raacda	Object	\$ 51,372	\$ 6,309,600	\$ 525,800
114102	Cashuurta gadida Hotelada	Object	\$ 94,980	\$ 98,580	\$ 8,215
114104	Cashuurta gadida allaabaha lasoo dejiyo	Object	\$ 3,423,708	\$ 3,051,504	\$ 254,292
114105	Cashuurta gadida tigidhada diyaaradaha	Object	\$ 604,656	\$ 573,456	\$ 47,788
114106	Cashuurta gadida allaabaha warshadaha yaryar	Object	\$ -	\$ 8,400	\$ 700
114107	Cashuurta Gadida Isgaarsiinta	Object	\$ 826,116	\$ 832,116	\$ 69,343
114108	Cashuurta gadida ee Dekadda Bossaso	Object	\$ 8,430,420	\$ 8,811,672	\$ 734,306
114109	Cashuurta gadida ee Dekadda Garacad	Object	\$ 437,988	\$ 132,864	\$ 11,072
114110	Cashuuraha kale ee gadida	Object	\$ 210,120	\$ 218,292	\$ 18,191
1142	Cashuurta wax soosaarka gudaha	Object Group	\$ 1,043,352	\$ 1,287,419	\$ 107,285
114202	Cashuurta wax soosaarka khayraadka badda	Object	\$ 123,492	\$ 146,736	\$ 12,228
114203	Cashuuraha kale ee wax soosaarka gudaha	Object	\$ 176,448	\$ 271,176	\$ 22,598
114204	Cashuuraha wax soosaarka soo dejinta badeecadaha	Object	\$ 743,412	\$ 869,507	\$ 72,459
1145	Cashuurta ogolaanshaha	Object Group	\$ 1,293,516	\$ 1,544,796	\$ 128,733
114501	Cashuurta socodka baabuurta	Object	\$ 1,048,188	\$ 1,022,964	\$ 85,247
114505	Ruqsada radiyaha iyo telefishinada	Object	\$ -	\$ 8,400	\$ 700
114508	Cashuurta nootaayooyinka	Object	\$ 132,828	\$ 394,932	\$ 32,911
114509	Cashuurta ogolaanshaha shaqada (Work permit)	Object	\$ 112,500	\$ 118,500	\$ 9,875
115	Cashuurta ganacsiga caalamiga iyo wax isdhaafsiga	Object Classification	\$ 60,953,136	\$ 61,456,451	\$ 5,121,371
1151	Cashuurta soo dejinta	Object Group	\$ 50,070,155	\$ 50,697,862	\$ 4,224,822
115101	Cashuurta macsiishada	Object	\$ 17,431,178	\$ 13,015,272	\$ 1,084,606
115102	Cashuurta qalabka dhismaha	Object	\$ 9,116,268	\$ 9,742,668	\$ 811,889
115103	Cashuurta Electric and electronic	Object	\$ 2,189,724	\$ 2,372,124	\$ 197,677
115104	Cashuurta gawaarida	Object	\$ 6,730,433	\$ 4,286,369	\$ 357,197
115105	Cashuurta allaabaha la isku qurxiyo (Cosmetics)	Object	\$ 485,268	\$ 492,468	\$ 41,039
115106	Cashuurta tubaakada	Object	\$ 685,176	\$ 987,576	\$ 82,298
115107	Cashuurta shidaalka	Object	\$ 6,215,208	\$ 6,329,208	\$ 527,434
115108	Cashuurta Qalabka Guryaha iyo Xafiisyadda	Object	\$ -	\$ 5,064,000	\$ 422,000
115109	Cashuurta kale ee soo dejinta	Object	\$ 159,456	\$ 164,256	\$ 13,688
115110	Cashuurta Qaadka	Object	\$ 5,786,105	\$ 5,865,221	\$ 488,768
115111	Cashuurta saliida iyo Gaaska	Object	\$ 547,908	\$ 715,788	\$ 59,649
115112	Cashuurta Qalabka Gaadiidka	Object	\$ 723,432	\$ 1,662,912	\$ 138,576
1152	Cashuurta dhoofinta	Object Group	\$ 10,882,981	\$ 10,758,589	\$ 896,549
115201	Cashuurta geela	Object	\$ 1,070,172	\$ 1,076,172	\$ 89,681
115202	Cashuurta Lo'da	Object	\$ 902,604	\$ 800,604	\$ 66,717
115203	Cashuurta ariga	Object	\$ 7,232,448	\$ 7,022,448	\$ 585,204
115204	Cashuurta faleenka iyo xabkaha	Object	\$ 254,880	\$ 327,264	\$ 27,272
115205	Cashuurta wax-soosaarka badda	Object	\$ 86,748	\$ 210,036	\$ 17,503
115206	Cashuuraha kale ee dhoofinta	Object	\$ 300,780	\$ 305,580	\$ 25,465
115207	Cashuurta Dhoofinta Kheyraadka Badda	Object	\$ 773,437	\$ 748,573	\$ 62,381
115208	Cashuurta Dhoofinta Macdanta	Object	\$ 261,912	\$ 267,912	\$ 22,326

MIISAANIYADDA DOWLADDA PUNTLAND 2026

116	Cashuuraha kale	Object Classification	\$	2,726,256	\$	3,018,456	\$	251,538
1162	Cashuuraha kale	Object Group	\$	2,726,256	\$	3,018,456	\$	251,538
116201	Moorka dakhliga	Object	\$	214,608	\$	275,124	\$	22,927
116202	Moorka dakhliga Furdooyinka	Object	\$	1,393,608	\$	1,593,192	\$	132,766
116203	Moorka kharashka	Object	\$	931,620	\$	981,276	\$	81,773
116204	Farankaboolo	Object	\$	138,420	\$	141,264	\$	11,772
116205	Lacag celin (ROR)	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
116206	Farkabooladda Diyaaradaha	Object	\$	48,000	\$	19,200	\$	1,600
12	Qaaraanka bulshada	Object Type	\$	696,372	\$	956,352	\$	79,696
121	Qaaraanka bulshada	Object Classification	\$	696,372	\$	956,352	\$	79,696
1211	Qaaraanka bulshada	Object Group	\$	696,372	\$	956,352	\$	79,696
121101	Taakulo caafimaad	Object	\$	575,100	\$	577,500	\$	48,125
121102	Sanduuqa shaqaalaha	Object	\$	60,552	\$	65,352	\$	5,446
121103	Howl Gabka iyo liitirka shaqaalaha	Object	\$	60,720	\$	313,500	\$	26,125
13	Deeqaha	Object Type	\$	22,541,685	\$	22,541,685	\$	1,878,474
133	Deeqaha laga helo qaybaha kale ee Dawlada	Object Classification	\$	22,541,685	\$	22,541,685	\$	1,878,474
1331	Socda	Object Group	\$	22,541,685	\$	22,541,685	\$	1,878,474
133101	Wareejinada ka yimaada Dawlada Federaalka	Object	\$	22,541,685	\$	22,541,685	\$	1,878,474
14	Dakhliyada kale	Object Type	\$	14,377,536	\$	23,436,410	\$	1,953,034
142	Dakhliga hantida	Object Classification	\$	13,173,888	\$	22,243,406	\$	1,853,617
1421	Dakhliga hantida	Object Group	\$	266,016	\$	260,676	\$	21,723
142101	Kirada daaraha	Object	\$	155,040	\$	158,640	\$	13,220
142102	Kirda baabuurta	Object	\$	33,648	\$	30,000	\$	2,500
142103	Kirda baabuurta hayaddaha	Object	\$	25,128	\$	29,928	\$	2,494
142104	Kirooyinka Guryaha Hayaddaha	Object	\$	52,200	\$	42,108	\$	3,509
1422	Ajuuradda maamulka	Object Group	\$	12,907,872	\$	21,982,730	\$	1,831,894
142201	Ajuuradda tijaabada baabuurta (Kalaawito)	Object	\$	683,652	\$	635,340	\$	52,945
142202	Ajuuradda ruqsada wadida baabuurta	Object	\$	57,252	\$	69,048	\$	5,754
142203	Ajuuradda ruqsada kalluumaysiga	Object	\$	2,625,756	\$	2,537,292	\$	211,441
142204	Ajuuradda ruqsada isgaarsiinta	Object	\$	69,996	\$	37,200	\$	3,100
142205	Ajuuradda ruqsada diyaaradaha	Object	\$	24,000	\$	32,796	\$	2,733
142206	Ajuuradda ruqsada sahaminta dhulka	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
142207	Ajuuradda ruqsada madbacadaha	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
142208	Ajuuradda ruqsada ganacsiga	Object	\$	349,020	\$	447,864	\$	37,322
142209	Ajuuradda ruqsada beeraha	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
142210	Ajuuradda maxkamadaha	Object	\$	162,888	\$	216,636	\$	18,053
142211	Ajuuradda iibsashada xariga jeelasha	Object	\$	10,320	\$	15,120	\$	1,260
142212	Ajuuradda socdaalka	Object	\$	846,024	\$	750,996	\$	62,583
142213	Ajuuradda dhoofayaasha	Object	\$	286,548	\$	261,492	\$	21,791
142214	Ajuuradda diwaangelinta qandaraasyada	Object	\$	1,184,232	\$	1,186,632	\$	98,886
142215	Ajuuradda diwaangelinta baasaboorka	Object	\$	195,828	\$	175,428	\$	14,619
142216	Ajuuradda Haamaha Gaaska	Object	\$	120,000	\$	127,200	\$	10,600
142217	Ajuuradda diwaangelinta maraakiibta iyo doonyaha	Object	\$	1,800	\$	54,744	\$	4,562
142218	Ajuuradda diwaangelinta kharashka	Object	\$	993,288	\$	1,218,708	\$	101,559
142219	Ajuuradda diwaangelinta hubka	Object	\$	42,000	\$	44,400	\$	3,700
142220	Ajuuradda diwaangelinta iibka hantida Dawlada	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
142221	Ajuuradda diwaangelinta baabuurta	Object	\$	25,632	\$	20,880	\$	1,740
142222	Ajuuradda taarikada baabuurta	Object	\$	221,760	\$	227,952	\$	18,996
142223	Ajuuradda adeega diyaaraha	Object	\$	205,920	\$	171,168	\$	14,264
142225	Ajuuradda dekada	Object	\$	69,480	\$	80,064	\$	6,672
142229	Ajuuradda xirfadlayaasha caafimaadka	Object	\$	4,632	\$	11,832	\$	986
142230	Ajuuradda ruqsada shirkadaha amniga	Object	\$	15,600	\$	22,800	\$	1,900
142231	Ajuuradda ruqsada hay'adaha aan dawliga ahayn (NGO)	Object	\$	42,972	\$	57,384	\$	4,782
142235	Curaarta Al-fathi	Object	\$	95,040	\$	98,088	\$	8,174
142236	Curaarta DPP	Object	\$	389,508	\$	348,300	\$	29,025
142237	Ajuuradda Difaaca Dekadda	Object	\$	-	\$	6,546,600	\$	545,550
142240	Curaarta rugta ganacsiga	Object	\$	13,140	\$	14,340	\$	1,195
142243	Curaarta hawlaha guud	Object	\$	125,700	\$	97,608	\$	8,134
142245	Ajuuradda deegaanka Kantrooladda	Object	\$	142,248	\$	182,400	\$	15,200
142246	Ajuuradda maxjarka	Object	\$	1,200,000	\$	1,200,000	\$	100,000
142247	Ajuuradda hubinta caafimaadka xoolaha	Object	\$	144,132	\$	151,332	\$	12,611
142248	Ajuuradda hubinta tayadda	Object	\$	-	\$	8,400	\$	700
142249	Ajuuradda gaadiidka kalluumaysiga badda	Object	\$	49,908	\$	40,272	\$	3,356
142250	Ajuuradda Hirarka isgaarsiinta	Object	\$	601,260	\$	786,120	\$	65,510
142251	Macaashka Baabuurta Xamuulka ah	Object	\$	1,669,536	\$	1,669,536	\$	139,128
142254	Ajuuradda diwaangelinta shahaadada Macdanta	Object	\$	2,400	\$	9,600	\$	800
142255	Ajuuradda shatiga Howlaha guud	Object	\$	31,200	\$	38,400	\$	3,200
142256	Ajuuradda shatiga Qandaraasyadda	Object	\$	31,200	\$	38,400	\$	3,200
142257	Ajuuradda dal ku jooga	Object	\$	78,000	\$	78,000	\$	6,500
142258	Ajuuradda Ruqsadda Sumadda Ganacsiga	Object	\$	12,000	\$	18,000	\$	1,500
142259	Ajuuradda Deegaanka Dekadda	Object	\$	84,000	\$	49,200	\$	4,100
142261	Ajuuradda Difaaca Goobaha Kale	Object	\$	-	\$	1,781,558	\$	148,463
142262	Khidmadda Wasaaradda Kalluumaysiga	Object	\$	-	\$	360,000	\$	30,000
142263	Khidmadda Wasaaradda Dekaddaha	Object	\$	-	\$	30,000	\$	2,500
142264	Shatiga Qareemadda	Object	\$	-	\$	3,600	\$	300
143	Ganaaxa iyo ciqaabta	Object Classification	\$	263,232	\$	274,032	\$	22,836
1431	Ganaaxa, ciqaabta iyo la wareegida	Object Group	\$	263,232	\$	274,032	\$	22,836
143101	Ganaaxa, ciqaabta iyo la wareegida	Object	\$	52,800	\$	46,800	\$	3,900
143102	Ganaaxyadda Kastamyadda /Dib u cashuurka.	Object	\$	107,232	\$	116,832	\$	9,736
143103	Ganaaxyadda Maxkamadaha	Object	\$	49,200	\$	51,600	\$	4,300
143104	Ganaaxyadda Tarifikadda	Object	\$	54,000	\$	58,800	\$	4,900
144	Wareejinada	Object Classification	\$	940,416	\$	918,972	\$	76,581
1441	Wareejinadda kale meel kale lagu sheegin	Object Group	\$	-	\$	-	\$	-
144101	Daymaha gudaha	Object	\$	-	\$	-	\$	-
1442	Wareejinada raasumaalka	Object Group	\$	940,416	\$	918,972	\$	76,581
144201	Dhismaha wadada Ceeldaahir-Ceerigaabo	Object	\$	940,416	\$	918,972	\$	76,581

MIISAANIYADDA DOWLADDA PUNTLAND 2026

SHAXDA J: MIISAANIYADDA DAKHLIGA OO GOB OLAYSAN 2026

DAKHLIGA OO GOBOLAYSAN MIISAANIYADDA SANADKA 2026														
Madax	FAAH-FAAHIN	Tax Type	Waaxda	Tax Category	Heads	Bari 2025	Nugaal 26	Mudug 26	Sool 2025	karkaar 26	Sanaag 26	Raas case	WADARTA BILAH	WADARTA SANNADKA
1	Dakhliga	N/A			Object Category	\$ 6,619,741	\$ 3,570,290	\$ 588,132	\$ 37,025	\$ 331,916	\$ 402,454	\$ 129,942	\$ 11,679,499	\$ 140,153,985
11	Cashuuraha	N/A			Object Type	\$ 5,372,310	\$ 1,229,127	\$ 505,293	\$ 22,711	\$ 258,897	\$ 339,632	\$ 40,326	\$ 7,768,295	\$ 93,219,538
